

Noqo qof Mas'uul ah oo ka Hortagga inay Dhacaan Musiibooyinka ay Keenaan



Iska demi aaladaha elegtarooniga ah oo iska geli meel aadan si fudud ugala soo bixi Karin ka hor inta aadan bilaabin inaad baabuurka kaxeeyso.

Weligaa ha gashan telefoonkaaga koofiyada ama marada hablaha ay madaxa ku xirtaan si telefoonka aad ugu hadasho adigoo kaxeynayaa baabuurka.

Noqo qof wanaagsan oo ay ku daydan darawalinta kale. Marka aad tahay rakaab ka codso in darawalka wicitaanada iyo qoraallada aad uu dirto, si isaga amaba iyada ay fiiro gaar ah oo buuxda ay ugu yeeshaan inay baabuurka si badqab leh uu kaxeeyan. Kala hadal carruurta in si mas'uuliyad leh loo kaxeeyo baabuurta.

Mar welibo xiro suunka baabuurka oo fadhiisi carruurta kuraasta badqabka leh si ay kaga ilaaliso darawalinta aan badqabka lahayn.

Dhamaan dadka wadada hareeraheeda ku lugeynayaa iyo kuwa bayskiilada wada waa inay fiiro gaar ah uu yeeshan waxyaabaha ku hareereysan mana aha inay isticmaalan aaladaha elegtarooniga ah.

Isha: Waxaa dib loo soo saaray 9/6/18 <https://www.nhtsa.gov/press-releases/us-dot-and-nhtsa-kick-5th-annual-u-drive-u-text-u-pay-campaign>

Haddii aad Farriin Dirto Adigoo Baabuurka Saaran, Waxey 20 Jeer Suurtagal tahay Inaad Gasho Shil Marka Lagula Barbardhigo Darawalka aan Mashquulsanayn

- 3450 qof ayaa lagu dilay shilal ay gaysteen darawaliin mashquulsan sannadkii 2016-ka.
- 562 qof oo ahaa kuwa wadada hareeraheeda ku socday, kuwo bayskiil kaxeynaayay iyo kuwo kale ayaa lagu dilay shilal ay sababeen darawaliin mashquulsan, sannadkii 2016-ka.
- Boqolkiiba 70 ee darawaliinta mashquulsan ee gaystay shilalka sababay dhimasho waxey ahaayeen rag, marka loo barbardhigo boqolkiiba 74 ee darawaliinta gaystay dhamaan shilalka sababay geeri.
- Isticmaalka telefoonka gacanta iyadoo uu qofka kaxeynaayo baabuur ayaa ku badan darawaliinta ay da'dooda uu dhaxeeyso 15 ilaa iyo 29.
- Darawaliinta haweenka ah ee isticmaalaya telefoonka gacanta ayay aad uu badnayd inay galaan shilalka geerida sababa ee ay keenaan darawaliinta baabuurta kaxeeya iyagoo mashquulsan marka loo barbardhigo darawaliinta ragga ah sanad kaste tan iyo 2012-kii.
- Boqolkiiba 9 ee dhamaan darawaliinta da'dooda ay uu dhaxeeyso 15 ilaa iyo 19 sano ee geystay shilalka sababay geeri ayaa lagu soo weriyay inay ahaayeen darawaliin baabuurta kaxeynaayay iyagoo mashquulsan.

(Sources: Retrieved 9/6/18 <https://www.nhtsa.gov/press-releases/us-dot-and-nhtsa-kick-5th-annual-u-drive-u-text-u-pay-campaign>)

Cunaqabataynta Sharciga ayaa uu Dhaxayn karaa Laga Bilaabo inaad Bixiso Ganaax iyo Lacagaha Dheeraadka ah ilaa iyo heerka Cawaqibka Daran ee Dhanka Socdaalka.

Waxey lidi ku tahay sharciga inaad isticmaasho telefoonka-gacanta amaba aaladda elegtarooniga ah ee gacanta lagu qaadan karo adigoo kaxeynayaa baabuur. Hawlaha sharci darrada ah waxaa qayb ka ah inaad gacanta ku haysato aaladda elegtarooniga ah ee gacanta lagu qaadan karo iyo inaad ku hadasho telefoonka gacanta wax aad ku qorto, ku dirto, ka akhriso, ka gasho, intarneetka ka isticmaasho, ku gudbis, ku keydsato, amaba dib aad uga soo saarto xogta elegtarooniga ah sida iimaylka, farriimaha qoraalka, ama booggaga intarneetka inaad qaado, dalacato, amaba aad ku gudbis sawirrada amaba aad ku ciyaarto cayaaraha.

Waxyaabaha ka reeban sharciga, micnaheeda, waa sharci in: Wac 911 amaba la xirii shaqaalaha caafimaadka, dab damiska amaba booliska adigoo kala hadlayaa xaalad degdeg ah. Si darawalka uu u isticmaalo telefoonka gacanta ee uusan gacanta ku haysanin, taas oo uu oggolaaneysa qofka isticmaalayaa in uu xirii la sameeyo dadka kale isagoo aan isticmaaleynin midba gacmihiisa. Si aad uu isticmaasho aaladda elegtarooniga ah ee gacanta taas oo lagu dhejiyo boorka baabuurka. Si aad uu isticmaasho aaladda kugu hageysa goobaha ee GPS loo yaqaano taas oo lagu dhejiyo baabuurka.

Tigidhka ganaaxa khaladaadka wadooyinka oo lagaga qaadayo ganaax iyo lacagaha dheeraadka ah iyadoo ay sabab uu tahay inaad isticmaashay aaladda elegtarooniga ah ee gacanta lagu qaato ayaa ku soo dhici karaa adigoo kaxeynayaa baabuurka. In lagugu helo dembiga ah isticmaalka telefoonka, isticmaalka aaladda elegtarooniga ah ee gacanta lagu qaadan karo ama xadgudubka dhanka diridda farriimaha ayaa sidoo kale keeni karaa in buundooyin lagugu daro diiwaankaaga kaxeeyta baabuurka ee DMV. Haddii aad hesho 11 buundo muddo 18 bilood gudahood ah, shaatiga darawalkaaga ayaa meesha laga saari karaa. Si wax badan aad uu ogaato, eeg [Ku saabsan Nidaamka Buundooyinka Darawalka NYS](http://dmv.ny.gov/tickets/about-nys-driver-point-system), <http://dmv.ny.gov/tickets/about-nys-driver-point-system>.

TS.DD. Somali. Distracted Driving (Rev. 2019)